



XAASHIDA XAQIIQDA

Waa maxay pertussis?

Xiiq-dheerta 'pertussis' waxaa keena bakteeriyo. Waxaa laga yaabaa in aad pertussis u taqaano magaceeda — xiiq-dheerta. Xiiq-dheertu waa infekshan ku dhaca habdhiska neefsashada. Calaamadaha caadiga ee xiiq-dheertu 'pertussis' waa cod-dheer “whooping” oo la sameeyo dhamaadka dhacdada qufaca ee daran. Tani waa waxa pertussis siiyay magaceeda caadiga ah ee loo yaqaan ee “xiiq-dheerta.” Xiiq-dheertu inta badan waxay ku tagtaa saddex ilaa lix bilood, xataa marka ay la socoto daaweyn.

Sida ay xiiq-dheertu 'pertussis' u faafto

Xiiq-dheertu 'pertussis' waxaa la faafiyaa marka si toos ah oo loo taabto dheecaanka iyo dhibcaha sanko iyo cunaha ee ka yimaada qufaca ama hindhisada.

Cidda halista ugu sugan

Xiiq-dheerta waxaa qaadi kara koox kasta oo da'a walba leh. Si kastaba ha ahaatee:

- Waxay inta badan ku dhacdaa dugsi caadiga ah ka hor 'preschool' ama carruurta gaartay da'ada dugsi lagu aado.
- Xiiq-dheertu waxay walwal gaarka u leedahay haweenka uurka leh iyo dhallaanka. Waxay noqon kartaa mid halis ah — xataa dhimasho u keeni kartaa — dhallaanka.

Calaamaddaha iyo astaamaha lagu garto

- Xiiq-dheertu waxay sida caadiga ah ku bilaabantaa astaamaha hargabka oo kale. Ka dibna waxay keentaa qufac si isdabajoog ah oo muddo socda kaasi oo aad u xun oo ay noqon karto in ay adkaato in aad neefsato.
- Qufaca isdabajooga ah ee muddada socda badanaa waa mid xun wuxuu keena matag.

Raadinta daryeel iyo daaweyn

- Wac dhakhtarkaaga haddii aad uur leedahay ama qabto astaamaha xiiq-dheerta 'pertussis', ama haddii ilmahaaga dhallaanka ahi uu qabo.
- Daryeel bixiyayaashu waxay inta badan xiiq-dheerta ku daaweeyaan antibiotics. Daawooyinka antibiotics waxaa laga yaabaa in ay sidoo kale caawimaad ka geystaan ka hortaga dadka ay soo gaartay xiiq-dheerta 'pertussis'.

Ka hortagga

- Haddii aad qabto calaamadaha xiiq-dheerta 'pertussis' guriga joog oo ha aadin shaqada, dugsi iyo goobaha kale dadweynaha adiga oo kala tashaday daryeel bixiyahaaga caafimaadka maahane.
- Habka ugu wanaagsan ee aad uga hortagi karto xiiq-dheerta 'pertussis' waa in lagu tallaalo!
- Waxaa jira tallaaf carruureed oo joogta ah si looga hortago xiiq-dheerta. Wuxuu yareeyaa suurtagalnimada infekshanka ku yimaada dhallaanka iyo carruurta.

- Dhallaanka iyo carruurta ku jirta dugsigu ka hor waa in ay qaataan isugeyn dhan shan qiyaasood “doses” oo ah tallaalka DTaP oo loogu talagalay ilaalinta ugu badan. Wuxuu ka ilaaliya gawracatada, teetanada iyo xiiq-dheerta ‘pertussis’. Carruurta waxay qaataan qiyaasaha “doses” marka ay da’doodu tahay 2, 4 iyo 6 bilood, marka ay jiraan 15 ilaa 18 bilood, iyo mar labaad marka ay jiraan 4 ilaa 6 sano.
- Carruurta dhallinyaro-xigeenka ah ‘preteens’ waxay qaataan qiyaasta xoojiyaha ‘booster dose’ oo ah Tdap marka ay jiraan 11 ama 12 sano. Tallaalka Tdap waa tallaalka xoojinta ‘booster shot’ ee caawimaada ka geysta in uu ka ilaaliyo carruurta dhallinyaro-xigeenka ah ‘preteen’ ama dhallintaada cudurro la mid ah sida tallaalka DTaP ay u qabtaan carruurta yar yar.
- Dhallinyarada ama dadka waaweyn ee aan qaadanin Tdap markii ay ahaayeen carruurta dhallinyaro-xigeenka ah ‘preteens’ waa in ay qaataan hal qiyaas “dose”.
- Qaadashada Tdap waxay si gaarka muhiim ugu tahay haweenka uurka leh inta ay ku jiraan seddexda bilood ee saddexaad ee ‘third trimester’ ee uur kasta. Tani waxay hooyada u saamaxdaa in ay sameyso waxyaabaha cudurrada la dagaalama ‘antibodies’ taasi oo ay u gudbiso ilmaha iyaga oo raacaya mandheerta. Tani waxay ilaalisaa ilmaha laga bilaabo isla marka waqtiga dhalashada.



WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo

Telefoonka: 971-673-1111

Website-ka OHA: <http://www.oregon.gov/oha/PH/DiseasesConditions/CommunicableDisease/Pages/index.aspx>

OHA Facebook: www.facebook.com/OregonHealthAuthority

OHA Twitter: www.twitter.com/OHAOregon

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo 971-673-1111 ama email u dir OHD.ACDP@dhsosha.state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.